

Bakteeriyada, Fayrasyada, iyo dulinnada ku jira biyaha la cabbo

Bakteeriyada ayaa meel walba kaga sugan deegaankeena, oo ay ku jiraan biyaha sare ee Minnesota iyo biyaha dhulka hoostiisa. Qaar ka mid ah bakteeriyadani waxyeelo ayay u geysan karaan caafimaadka aadanaha. Cabitaanka biyaha ay ku jiraan bakteeriyada, fayrasyada, ama baarasaatka/dulinnada cudurrada keena (oo wadajir ahaan loogu yeero cudur-sidaha) waxay kugu keeni karaan jirro. Maaha wax la taaban karo in la tijaabiyo biyaha la cabbo nooc kasta oo cudur keenaha ah, laakiin way fududahay in biyaha la cabbo laga baadho bakteeriyada coliform. Ku jiritaanka bakteeriyada coliform waxay muujin kartaa inay jiri karaan cudur-sidaha waxyeellada leh ee biyaha ku jira.

Saamaynta Caafimaadka

Ku jiritaanka biyaha la cabo bakteeriyada coliform, gaar ahaan *E. coli* (nooc ka mid ah bakteeriyada coliform), waxay tilmaameysaa in biyaha laga yaabo inay ku jiraan cudur-side keena shuban, matag, calool majiir, lallabbo, madax-xanuun, qandho, daal, iyo xitaa mararka qaarkood dhimasho. Dhallaanka, carruurta, dadka da'da ah, iyo dadka hab-dhiskooda difaacooda daciifka ah waxay u badan tahay inay saameeyaan cudur-sidaha biyaha la cabbo.

Sida Loo Ilaaliyo Naftaada iyo Qoyskaaga

Hay'adda Ilaalinta Deegaanka ee Mareykanka (EPA) waxay u baahan tahay nidaamyada biyaha dadweynaha si ay si joogto ah uga baaraan biyaha wadarta bakteeriyada coliform (koliform) iyo *E. coli* ee ku jirta. Biyo nadiif ah oo la cabbo kuma jiri karaan *E. coli* ama cudur-side kale.

Haddii aad leedahay ceel gaar ah

Halkan waxaa lagu muujiyay talooyin ku saabsan sida looga hortago iyo wax ka qabashada fadaraynta bakteeriyada coliform:

Ka hortagga fadaraynta

- **Ceelkaaga ka qod meel ammaan ah.** Eeg *Ilaalinta Ceelkaaga wixii hagitaan ah*.
- **Si joogto ah uga baar dhaawaca ceelkaaga** (eeg *Ilaalinta Ceelkaaga*). La xiriir qandaraasle ceelasha qoda oo shati leh haddii aad aragto wax dhaawac ah (eeg *Tusaha Qandaraasleyaasha Shatiga leh ee Ceelasha qoda*).
- **Ka baar biyaha ceelkaaga sanad walba**

bakteeriyada coliform. Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad si joogto ah u baaritaan ugu sameysa biyaha ceelkaaga. Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (Minnesota Department of Health [MDH]) waxay ku talinaysaa in la isticmaalo shaybaarada la aqoonsan yahay si loo baaro biyaha ceelkaaga (eeg Search for Accredited Labs [Raadinta Shaybaarada La aqoonsan yahay]). Contact the laboratory to get sample containers and instructions, or ask your county environmental or public health services if they provide well water testing services.

- **Ceelkaaga ku mayr/dhaq dareere koloriin ah** haddii biyaha daadku ceelkaaga u jiraan masaafo 50 cagood ah; Dhadhanka, muuqaalka, ama urta biyahaagu uu isbedelay; ama ceelkaaga afkiisa ayaa loo furay hagaajin. Eeg *tilmaamaha Jeermis ka nadiifinta Ceelka* ama qabso qandaraasle shati u leh ceelasha.
- **Si joogto ah u ilaali ilaha wasakhaysan,** sida hababka septic-ga qoyska.

Wasakhaynta Cinwaanka

Haddii bakteeriyada coliform laga helo biyahaaga, raac talaabooyinkan:

- **Jooji u isticmaalida biyaha cabitaan cunto karinta,** ilaa aad ka karkariso si buuxda ilaa hal daqiiqo ka hor intaadan isticmaalin. Waxa kale oo aad isticmaali kartaa biyaha sifeysan ee caagaga ku jira ama biyo laga keenay meel kale oo ammaan ah oo la yaqaan.
- **Ceelkaaga ku nadiifi dareere koloriin ah** (eeg *Jeermis ka Nadiifinta Ceelka [Well Disinfection]*).
- **Baaritaan ku samee biyaha ceelkaaga** mar labaad mar aad ceelkaaga jeermi-dilista ku sameyso ka dib si aad u xaqiijiso in aysan

Bakteeriyada, Fayrasyada, iyo dulinnada ku jira biyaha la cabbo

bakteeriya coliform saameysay.

- Waxaad mar labaad isticmaali kartaa biyaha, adiga oo aan karkarin, marka ceelka la jeermi-dilista lagu sameeyo oo biyuhu aysan mar dambe aan laga helin bakteeriyada coliform.

Haddii aad biyaha ka hesho nidaamka biyaha dadweynaha

Nidaamkaaga biyaha dadweynaha si joogto ah ayaa looga baaraa bakteeriyada coliform. Nidaamku wuxuu soo saari doonaa ogeysiis dadweyne 24 saacadood gudahood haddii uu ogaado *E. coli*. Ogeysiiska dadweynaha ayaa kuu sheegi doona waxa aad samayneyso si aad u badbaado.

Waxaad ka heli kartaa natiijooyinka baaritaanka bakteeriyada coliform ee nidaamka u adeegaya meesha aad ku nooshahay adiga oo akhrinaya warbixinta tayada biyaha ee nidaamka (sidoo kale loo yaqaan Warbixinta Kalsoonida Macmiilka Consumer Confidence Report [CCR]). Waxaad wici kartaa nidaamka biyaha dadweynaha si aad u hesho nuqul warqad ah oo ah CCR-gaaga, ama waxaad ka heli kartaa onlayn (eeg *Warbixinnada Kalsoonida Macmiilka [Consumer Confidence Report]*). Haddii aad rabto inaad hesho natiijada baaritaanka bakteeriyada coliform ee meel ka baxsan gurigaaga, la xiriir nidaamka biyaha ee u adeegaya goobtaas.

Xogta Asalka ah

Saxarada waxaa ku jira cudur-siyaal badan. Caadiyan ilaha ay ka timaado saxarada deegaankeena waxaa ka mid ah bullaacadaha, hababka septic-ga, iyo digada xoolaha. Cudur-sidayaasha ka yimaada ilahan waxay geli karaan biyaha aan cabbo. Baaritaanka biyaha la cabbo laga baarayo bakteeriyada coliform waa hab fudud oo lagu ogaanayo haddii uu jiro cudur-sidaha biyaha ku jira. Haddii sidoo kale baaritaanka biyuhu lagu helo bakteeriyada *E. coli*, biyuhu waxay leeyihiin saxaro.

Bakteeriyada, fayrasyada, iyo baarasiidka/dulinnada ku jira Biyaha Minnesota

Gobol beeralay ah ahaan, Minnesota waxay leedahay beero badan iyo moorooyin xoolaha lagu hayo. Milkiilayaasha guryaha ee miyiga degan waxay ku tiirsan yihiin nidaamka septic si ay u daaweeyaan

saxarada iyo waskhda gurigooda. Waxaan leenahay duurjoog badan, oo inta badan dadka ka ag dhow. Intaa waxaa dheer, nidaamyada bullaacadaha magaaladu waa gaboobaan oo wayna soo butaaci karaan. Waxaa dhici karta in saxarada ama digada mid ka mid ah ilahan ay geli karto biyaha harooyinka, durdurrada, webiyada, iyo mararka qaarkood biyaha dhulka hoostiisa ku jira. Nidaamyada biyaha dadweynaha ee Minnesota iyo MDH waxay si joogto ah uga baaraan bakteeriyada coliform nidaamka biyaha dadweynaha waxayna ka wada shaqeeyaan sidii loo saxi lahaa dhibaatooyin haddii biyaha laga helo bakteeriyada coliform.

Dhammaan ceelasha biyaha laga cabo ee dhawaan la qoday/dhisay ee Minnesota waxa laga baaray bakteeriyada coliform. Haddii bakteeriyada coliform laga helo ceel, Minnesota's Well Code (Sharciiga Ceelasha ee Minnesota) wuxuu qasab uga dhigayaa qandaraaslaha ceelka in uu jeermi-dill ku sameeyo ceelka oo uu xaqiijiyo in uu aanu lahayn bakteeriyada coliform ka hor inta aan ceelka la isticmaalin. Baaritaanka saamiga bilowga ah wixii ka dambeeya waa masuuliyada milkiilaha ceelka gaarka ah.

Waxa ay MDH qabanayso

MDH waxay nidaamisaa nidaamyada biyaha dadweynaha iyadoo:

- Bixineysa oggolaanshaha qorshayaasha dhismaha iyo sifeynta nidaamyada biyaha dadweynaha.
- Dhaqangelinta Xeerka Badbaadada Biyaha la cabbo.
- Baaritaanka howlaha biyaha dadweynaha.

MDH waxa ay maamushaa ceelasha gaarka ah iyo kuwa dawliga ah waxayna la shaqaysaa milkiilayaasha ceelasha gaarka ah iyada oo dejisa islamarkaana dhaqan galinaysa *shuruuc iyo xeerar hagaya in si sax ah loo dhiso ceelasha gunta-dheer iyo kuwa gunta-gaaban iyo xiritaanka/aanburidda ceelasha gunta-dheer iyo kuwa gunta-gaaban*.

MDH waxa kale oo ay samaynaysaa *Daraasad la Soconeyso Fayraska Biyaha Dhulka hoostiisa (Groundwater Virus Monitoring Study)* ku jira si ay wax uga ogaato jiritaanka fayrasyada ee biyaha dhulka Minnesota hoostiisa ah iyo waxa ay uga dhigan tahay caafimaadka bulshada.

Waxa Kooxaha Kale ay Sameynayaan

Hay'adda Xakamaynta Wasakhowga Minnesota (Minnesota Pollution Control Agency) waxay la shaqaysaa saamileeyda gobolka oo dhan si loo dhimo qashinka xoolaha iyo dadka ee soo galaya biyaha Minnesota.

Ilaha

- [Bacterial Safety of Well Water \(Badbaadada Bakteeriyada Biyaha Ceelka\) \(PDF\)](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/water/docs/wells/waterquality/bacteria.pdf) (www.health.state.mn.us/communities/environment/water/docs/wells/waterquality/bacteria.pdf)
- [Construction of Wells and Borings \(Qodidda Ceelasha gunta dheer iyo Ceelasha gunta gaaban\)](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/construction) (www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/construction)
- [Consumer Confidence Reports \(Warbixinnada Kalsoonida Macaamilka\)](http://www.health.state.mn.us/ccr) (www.health.state.mn.us/ccr)
- [Groundwater Virus and Monitoring Study \(Cilmi-baarista Fayraska iyo Kormeerka Biyaha Dhulka\)](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/water/cwf/virus) (www.health.state.mn.us/communities/environment/water/cwf/virus)
- [Sharciyada iyo Xeerarka: Well Management Program \(Barnaamijka Maareynta Ceelasha\)](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/rules) (www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/rules)
- [Licensed Well and Boring Contractor Directory \(Hagaha Qandaraasleyaasha Shatiga leh ee Ceelasha qoda\)](http://www.health.state.mn.us/lwcsearch) (www.health.state.mn.us/lwcsearch)
- [Protecting Your Well \(Ilaalinta Ceelkaaga\)](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/construction/protect) (www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/construction/protect)
- [Public Drinking Water Program \(Barnaamijka Biyaha Dadweynaha\): Enforcing the Safe Drinking Water Act \(Dhaqangelinta Xeerka Badbaadada Biyaha La Cabo\)](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/water/factsheet/dwprog) (www.health.state.mn.us/communities/environment/water/factsheet/dwprog)
- [Septic Systems—Subsurface Sewage Treatment Systems \(Nidaamyada Septic — Nidaamka Daawaynta Bulacadaha Dhulka Hoostooda ah\)](http://www.pca.state.mn.us/water/subsurface-sewage-treatment-systems) (www.pca.state.mn.us/water/subsurface-sewage-treatment-systems)
- [Sealing of Wells and Borings \(Xiridda/Aanburidda](#)

- [Ceelasha gunta dheer iyo kuwa gunta qaaban\)](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/sealing) (www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/sealing)
- [Raadi Shaybaaro La Aqoonsan yahay](http://www.health.state.mn.us/labsearch) (www.health.state.mn.us/labsearch)
- [Well Disinfection \(Jeermis ka Nadiifinta Ceelka\)](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/waterquality/disinfection) (www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/waterquality/disinfection)

Minnesota Department of Health (Waaxda Caafimaadka ee Minnesota)
Environmental Health Division (Qaybta Caafimaadka Deegaanka)
651-201-4700
health.drinkingwater@state.mn.us
www.health.state.mn.us

08/06/2019R

Si aad xogtan ugu hesho qaab sidan ka duwan, wac: 651-201-4700. Waxaa lagu daabacay warqad dib loo warshadeeyay.